

## Kooxda wax qabadka bulshada ee degmada (SIG) Borlänge



## Waa maxay Kooxda wax qabadka bulshada (SIG)?

- Kooxda wax qabadka bulshada waa koox la qayb qaadata dhallin yarada u dhaxaysa 13 - 25 sano.
- Ogolaanshaha waxaa laga soo qaadayaa waalidka masuuliyad haya iyo ilmaha. Deedna waxaa dhallin yarada loo wada fadhiisinayaa shaqaale hay'ado kala duwan iyadoo laga duulayo hadba baahidiisa.
- Wakiilada hay'adaha dowladda ka imaanaya waxaa ugu horreeya xafiiska adeegga bulshada ( xitaa isugu yeedhe), booliiska, waaxda kaaliyeyaasha guul wadayaasha, daryeelka furan ee degmada, macalimiinta / maamulaha, xafiiska xiriirka shaqada, maamulka caafimaadka gobolka, daryeelka dambiilayaasha ama wax qabadyada kalee daryeelka iyo ama qofka ugu muhiimsan dhallin yarada.
- Xafiiska adeegga bulshada wuxuu masuul ka yahay arrimaha kooxda wax qabadka bulshada iyo waliba dhammaan wixii diiwaan gelin ah. Waxaa la furayaa xaqiiqo raadinta iyadoo la cuskanayo xeerka sinnaanta cutubkiisa 11 aad, faqradiisa 1 aad ee SoL xeerka adeegga bulshada. Waxaa kaloo la sii fulinayaa xaqiiqo raadinta SAVRY ( Structure Assessment Of Violence Riski in Youth) taas oo ah qalabka lagu qiimeeyo halista ay ku suganyihiin dhallin yarada u dhaxaysa 13 a20 sano. Tan waxaa loo isticmaala ka doorashada geeddi socodka ku saabsan SIG taas oo ah dhacdo cunfi dambiyeed dib u soo noqota iyo dambi galid xooggan oo la qiimeeyay.
- Cunug kasta si gara ah ayaa loogu samaynayaa qorshe fulineed, kaas oo ah waa kee higsiga la doonayo in la gaadho, iyo sedee baa higsigaas loo gaadhayaa.
- Higsiga ugu horreeyaa waa in laga hor tago in dhallin yaradu ay ku dhacaan halis ah dambiyoy, ama in ay u carbiyaan goosan danbiillenimo iyo waliba in loo fududeeyo inay ka baxaan dambiile nimada kooxaysan.
- Sir xifdinta waxaa guddoonsanaya dhammaan hay'adaha dowladda / ka qayb qaatayaasha.

## Waa noocce wax qabadka laydin siinayo?

Hay'adaha dowladda ee kala duwan ama ka qayb qaatayaasha waxay bixinayaa wax qabad iyo taageero, cad iyo ahaanna waxay bixin karaan hadba qofka baahidiisa sida ay tahay. Tusaale ahaan haddii ay baahidu tahay:

- Dambiile nimo.
- Isticmaala khaldan ee mukhaadaraadka.
- Dhibaato ka timaaddaa xagga dugsiga.
- Xagga xiriirka qoyska.
- Baadhitaanka xagga dhimirka

Wax qabadka waxay ka koobnaan karaan:

- Wada hadala / Dhiirri gelin.
- Daweyn / shaqsi shaqsi / qoys ahaan.
- Qorshaha naqtiinka ee dugsiga, xafiiska xiriirka shaqada iwm.

## Sidee baan anigu ula xidhiidhaa SIG?

Cid miyaad garanaysaa, baahi miyay ku haysaa ama ma leedahay is waydiimo ku saabsan SIG? La xidhiidh kuwa kuugu dhow.

- Xafiiska adeegga bulshada.
- Ciidanka booliiska.
- Maamulaha, foom masterka iyo la taliyaha.
- Kaaliyayaasha guul wadayaasha.
- Daryeelka dambilayaasha / kor meerayaasha dadka xabsiga ka soo baxa.
- Xafiiska xiriirka shaqada.
- Xafiisyo kale sida: dhaqtarka dhimirka, LSS xeerka taageero iyo u adeegidda, xarunta baxnaanada, Brå oo ah guddiga ka hor tagga dambiyada.

## Wadajirkeyno waa xoog